University of Vermont Health

University of Vermont Medical Center

# Soo koobidda Siyaasadda

### Caawimo hel bixinta daryeelka caafimaadka.

Waxaan leenahay barnaamij gargaarka maaliyadeed si aan kuugu caawino inaad awooddo daryeelka aad u baahan tahay.

### Waa maxay barnaamijka gargaarka maaliyadeed?

Waxaan gargaarka maaliyadeed siinnaa dadka aan haysan caymis. Waxaan sidoo kale gargaar siinnaa dadka leh caymis laakiin aan awoodin inay bixiyaan kharashaadka ay tooska u bixiyaan. Waxa lagu isticmaali karaa daryeel joogto ah iyo xaalado degdeg ah. Daryeelku waa inuu noqdaa mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah caafimaadkaaga si loo ansixiyo gargaarka.

### Yaa heli kara gargaarka maaliyadeed?

Si aad u qalanto:

- **Xaq u lahaanshuhu wuxuu ku saleysan yahay dakhliga iyo hanti**; eeg codsiga dukumeentiyada lagama maarmaanka ah.
- **Waa inaad noqotaa "Deggan Vermont"** – tani waxa ay ku jiraan ardayda, dadka ka shaqeeya Vermont, muhaajiriinta aan haysan dukumeenti, dadka ku nool Vermont laakiin aan haysan guri joogto ah. Ma ku jiraan booqdayaasha ama dadka safarka ah ilaa adeeg caafimaad degdeg ah la doonayo.
- **Dakhligaagu waa inuu ka yar yahay xadka.** Waxaa jira xuduud dakhli oo kala duwan loogu talagalay daryeel bilaash ah iyo daryeel qiimo jaban. Eeg jaantusyada.
- **Khayraadkaaga "galaadha" waa inuu ka yaraadaa xadka.** Kuwani waa lacag caddaan ah, akoonnada hubinta iyo kaydka, iwm. (Gurigaaga ugu weyn, gaarigaaga, iyo akoonnada hawlgabka laguma darin xisaabta).

# Xuduudaha Dakhliga

Raadi cabbirka qoyskaaga iyo dakhligaaga jaantusyada hoose. Dadka intooda badan, cabbirka qoyskaaga waxa uu noqon doonaa dadka ku qoran canshuur celintaada. Haddii aad heshid lacag ka badan intii loogu talagalay daryeel bilaash ah, waxa laga yaabaa inaad u qalanto daryeel qiimo jaban.

# Daryeel Bilaash ah

**Waxaad heli kartaa daryeel bilaash ah (bixinta $0) haddii dakhliga qoyskaagu uu ka hooseeyo 250% ee Federal Poverty Level (FPL).** Sannadka 2026, dakhligaagu waa inuu ka yaraadaa:

| Cabbirka Qoyska | Dakhliga Ugu Badan |
|---|---|
| 1 qof | $39,900 |
| 2 qof | $54,100 |
| 3 qof | $68,300 |
| 4 qof | $82,500 |
| 5 qof | $96,700 |
| 6 qof | $110,900 |
| 7 qof | $125,100 |
| 8 qof | $139,300 |

# Daryeel qiimo jaban

**Haddii dakhliga qoyskaagu uu ka hooseeyo 400% ee Federal Poverty Level (FPL), waxa laga yaabaa inaad u qalanto qiimo dhimis 76%.** Sannadka 2026, dakhligaagu waa inuu ka yaraadaa:

| Cabbirka Qoyska | Dakhliga Ugu Badnaan |
|---|---|
| 1 qof | $63,840 |
| 2 qof | $86,560 |
| 3 qof | $109,280 |
| 4 qof | $132,000 |
| 5 qof | $154,720 |
| 6 qof | $177,440 |
| 7 qof | $200,160 |
| 8 qof | $222,880 |

# Daryeelka Musiibada

Weydii ku saabsan daryeelka musiibada (si daran u dhaawacmay ama u xanuunsan) haddii aad isbitaalka ku leedahay lacag badan, laakiin dakhligaagu uu aad u sarreeyo si aad ugu qalanto daryeel bilaash ah ama daryeel qiimo jaban. Noocan gargaar waxaa la siiyaa bukaanada haraagooda ka badan 20% dakhliga sanadlaha ah ee qoyska. **Waxaan kaa caawin karnaa inaan go'aamino haddii aad xaq u leedahay.**

*Macluumaad dheeraad ah ka eeg dhabarka*

## Adeegyada Daboolan

- Adeegyada caafimaadka degdegga ah ee lagu bixiyo qolka degdegga ah ee isbitaalka;
- Adeegyada degdegga ah ee xaalad haddii aan si degdeg ah loo daaweyn ay u horseedi lahayd isbedel waxyeello leh oo ku yimaada caafimaadka qofka;
- Adeegyada caafimaad ee la dooran karo laakiin caafimaad ahaan lagama maarmaan ah

## Adeegyada Aan La Daboolin

- Adeegyada quruxda/jir-dhiska
- Adeegyada taranka/dhalmada
- Adeegyada aan caafimaad ahaan lagama maarmaan ahayn
- Adeegyada cilmi-baarista / waayo-aragnimada
- Daryeelka bukaanada caalamiga ah ilaa adeegga lagu bixiyo qolka degdegga ah; waxaa lagu qeexaa booqdayaalee ma aha deggenayaal
- Adeegyada lagu bixiyo Apple Tree Bay

## Sida loo codsado

Waxaad codsan kartaa ka hor ama ka dib markaad hesho adeegyada caafimaadka.

### Raac tillaabooyinkan:

1. **Hel codsi bilaash ah.**
   - Shakhsi ahaan: UVMMC Registration
   - Onlayn: Gargaarka Maaliyadeed (uvmhealth.org)
   - Teleefoon: Wac (802)847-8000
2. **Buuxi codsiga.** HA ka tagin wax qayb ah oo bannaan. Ku dar dukumeentiyada taageerada sida lagu xusay codsiga.
3. **Gudbi ama noo keen codsigaaga dhameystiran.**
   - Keen goobta: UVMMC Financial Services-3rd floor, lobby. UVMMC
   - Ku dir boostada:
     University of Vermont Health Network
     Financial Assistance Program
     Patient Access Department IDX 22052
     111 Colchester Avenue
     Burlington, VT 05401

Waxaad naga heli doontaa warqad 30 maalmood gudahood. Waxay ku qori doontaa haddii codsigaaga la oggolaaday, la diiday, ama haddii aad u baahan tahay inaad dirto macluumaad dheeraad ah.

Haddii codsigaaga la diido, waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aankaas. Codsiyada rafcaanka waa in loo diraa Patient Financial Assistance Specialist iyadoo qoraal ah 60 maalmood gudahood laga bilaabo codsiga la diiday, waxaana ku jiri doona sababta rafcaanka.

## Sida caawimaad loogu helo buuxinta codsiga

- **Booqo xafiiska la-talinta maaliyadeed:** Shakhsi ahaan- UVMMC-Financial Services- 3rd floor
- **WAC**: (802) 847-8000

## Taageero luqadeed oo bilaash ah

Waxaan siinaa caawimo bilaash ah dadka leh baahiyo isgaarsiineed ama luqadeed. Waxaan sidoo kale ka caawin karnaa dadka u baahan macluumaadkan siyaabo kala duwan. Wixii lagu turjumayo ama taageero tarjumaad, wac lambarkan 802-847-8899.

## Macluumaad Dheeraad ah

### Yaa aqbalaya gargaarka maaliyadeed?

Dhammaan bixiyeyaasha laguma daboolo siyaasadda gargaarka maaliyadeed. Ka fiiri liiskeena halkan: Gargaarka Maaliyadeed (uvmhealth.org). Waxaad sidoo kale naga weydiin kartaa dhakhtarkaaga.

### Akhri siyaasadda oo dhan

Tani waa soo koobid luuqad fudud oo ku saabsan siyaasadda gargaarka maaliyadeed. Siyaasadda buuxda waa kuwan: Gargaarka Maaliyadeed (uvmhealth.org).

## Eex-la'aan

Ma eexanno ku salaysan: jinsiyad, midab, jinsi, jihada galmada, aqoonsiga jinsiga, xaaladda guurka, diinta, asal, dalka laga soo jeedo, dhalashada, xaaladda muhaajirnimo, luqadda ugu weyn, naafonimo, xaalad caafimaad, ama macluumaadka hidde-sideyaasha.

### Maxaa xiga?